

## **Su'aalaha Marwalba La isweydiiyo ee Warbixinta Ugu Dambaysa**

### **Maxaa ku jira warbixinta ugu dambaysa?**

Guddigu wuxuu dejiyey qorshe dib loogu qaabeynayo nidaamka caafimaadka dhimirka iyo fayo-qabka ee Victoria. Dib u habayntani waxa ka faa'iideysan doono dhammaan bulshada Victoria.

Warbixinta ugu dambaysa waxaa ku jira 65 talo oo ku saabsan isbedelka. Kuwani waxay ku dhisan yihiin sagaalka talo ee ku jira warbixinta ku meel gaarka ah ee Guddiga.

Mid ka mid ah dib u habeynta muhiimka ah ayaa ah in caafimaadka dhimirka iyo nidaamka fayo-qabka looga dhigo mid sahlan oo qof walba isticmaali karo. Si tan loo sameeyo, nidaamka mustaqbalka waxaa ka mid noqon doona 50-60 adeegyo caafimaad dhimirka iyo fayo-qabka. Adeegyadan waxay siin doonaan daaweyn, daryeel iyo taageero dadka waaweyn.

### **Ayaa fulin doona talooyinka?**

Dowladda Victoria waxay fulin doontaa dhammaan talooyinka ay soo jeediyeen Guddiga. Qeybta cusub ee Caafimaadka dhimirka iyo qeeybaha ee Waaxda Caafimaadka ayaa maareyn doonta nidaamka caafimaadka dhimirka iyo fayo-qabka. Iyaga ayaa mas'uul ka noqon doona fulinta talooyinka Guddiga.

### **Goorma ayaa talooyinka la fulin doonaa?**

Talooyinka Guddigu waxay u taagan yihiin isbeddel weyn oo ku yimaada caafimaadka dhimirka iyo nidaamka fayo-qabka. Waqti ayey qaadan doontaa in la sameeyo isbedeladan.

Qaar ka mid ah talooyinka ka soo baxay warbixinta ku meel gaarka ah ayaa hada socda. Tan waxaa ka mid ah ballaarinta Is gaarsiinta isbitaalada is dilid kadib Hawlgelinta (HOPE). Talooyinka kale waxay qaadan doonaan waqti dheeri ah.

Guddigu wuxuu qeexay ajandaha dib u habeynta 10 ka sano oo ay ku jiraan saddex mowjado:

- teeramka gaaban - dhammaadka 2022
- teeramka dhaxe - dhammaadka 2026
- teeramka dheer - dhammaadka 2031.

### **Miyaan heli karaa nuqul adag oo ah warbixinta ugu dambaysa?**

Royal Commission waxaa ka go'an inuu yareeyo raadkiisa deegaanka. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad [akhriso warbixinta ugu dambaysa iyo soo koobista iyo talooyinka khadka tooska ah](#).

Haddii aadan internet ku haysan guriga, waxaad isku dayi kartaa maktabadda deegaankaaga si aad ugu akhrisato warbixinta khadka tooska ah. Waxaad ka heli kartaa maktabadda [Maktabada Dadweynaha Victoria Websaytka halkaan](#).

### **Ka waran haddii qabooan su'aal ku saabsan warbixinta ugu dambeysa?**

Si aad u weydiiso su'aal ku saabsan warbixinta kama dambaysta ah, fadlan iimayl nogu so dir [mentalhealth@dhhs.vic.gov.au](mailto:mentalhealth@dhhs.vic.gov.au).

Waxaad sidoo kale awoodi kartaa inaad ka hesho macluumaadka aad raadineyso kuwan [xaashiyaha xaqiiqda](#) iyo [muuqaalo Lasameyay](#) ee ku saabsan warbixintii ugu dambeysay.

### **Miyaan weli wax ka dhihi karaa shaqada Guddiga?**

Guddiga Royal wuu dhammaaday, markaa ma aqbali karo tabarucaad dheeri ah.

Komishanku wuxuu ka helay in ka badan 12,500 tabarucaad shaqsiyaad iyo ururo intaba. Tan waxaa ka mid ahaa ku dhowaad 3,000 jawaabo oo ku saabsan sahan shaqaale iyo in ka badan:

- 3,200 gudbinaad
- 1,650 qof oo kaqeybgalay fadhiyada wadatashiga bulshada,
- 250 marqaatiyed
- 3,000 oo jawaab celin ah oo ku saabsan ra'yi ururinta bulshada.